**Febraayo 2021 Dhacdada Cimilada iyo Lacagta dheeraadka ah ee Biilka Ku-meelgaarka ah**

Bartamihii Febraayo 2021, qaybo badan oo dalka ka mid ah waxay la kulmeen muddo dheer oo heerkul aad u qabow ah. Dalabka cirka isku shareeray ee gaaska dabiiciga ah iyo arrimaha agabyada muhiimka ah ee meelaha qaarkood ayaa gacan ka gaystay koror degdeg ah oo aan hore loo arag.

Intii lagu jiray heerkulka subzero (ebar ka hooseeya) oo dheeraaday, waxaan ku guuleysanay inaan sii wadno adeeg la isku halleyn karo oo siinaya macaamiisheena Minnesota inay ahaadaan kuwo ammaan ah iyo diirimaad hela. Laakiin, sida adeegyada kale ee Minnesota iyo gobollo badan, waxaan la kulannay kharashyo aan caadi ahayn oo aan laga maarmi karin xaaladaha suuqa ee aadka u daran markii aan helnay gaas dabiici ah si aan u kaabno agabka gaas gudbinta ugu hooseeyo iyo kaydinta.

Sida adeeg la maamulo, waxaa nalooga baahan yahay inaan soo iibsanno oo aan gaarsiinno macaamiisheena gaaska dabiiciga ah. **Qiimaha aan ku bixinno gaaska dabiiciga ah waa isla qiimaha aan ka qaadno macmiisheena-iyada oo aan lahayn wax qiimo ah oo lagu daray.**

Caadi ahaan, macaamiishu waxay bixin doonaan kharashaadka gaaska dabiiciga ah ee dheeraadka ah muddo ka badan 12 bilood, laga bilaabo bisha Sebtembar. —laakiin iyadoo sababtuna tahay baaxadda kharashyadan, hannaanka hadda jira micnaheedu waa biilal aad u sarreeya, gaar ahaan bilaha wax kululayska jiilaalka markaas oo biilasha awalba badnaayeen.

**Si gacan looga geysto ilaalinta macaamiisheena loona yareeyo saameynta biilasha bilaha ah ee xaaladdan aan horay loo arag, waxaan soo jeedinay qorshe in si taxaddar leh loo habeeyay si loo dhexgalo loona faafiyo kasoo kabashada qiimaha muddo dheer.**

Bishii Agoosto 5, 2021, Minnesota Public Utilities Commission (Guddiga Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota) (MPUC) ayaa ansixiyay qorshaheena ah inaan bilowno dib uga soo kabashada kharashyada gaaska dabiiciga ah ee aadka u sarreeya laga bilaabo Febraayo 2021, iyada oo loo marayo lacag dheeraad ah oo ku-meel-gaar ah oo laga yaabo inay ka muuqato biilkaaga “Dhacdada Cimilada Febraayo 2021.” Iyada oo la raacayo go'aanka MPUC, adeegyada kale ee gaaska dabiiciga ah ee la nidaamiyay ee Minnesota ayaa sidoo kale ku daraya lacag dheeri ah oo tii la mid ah biilasha macaamiishooda.

Waxaan fahansanahay in kharashka dheeraadka ah uu noqon karo mid lama filaan ah ama ku adag macaamiisheena.

Haddii macaamiishu u baahan yihiin in laga caawiyo bixinta biilkooda, xulashooyinka qorshaha lacag-bixinta ayaa la heli karaa. Fadlan ka booqo websaydhkeena barta CenterPointEnergy.com/PaymentAssistance ama ka wac adeegga macmiilka CenterPoint Energy lambarka 800-245-2377. Waxaan sidoo kale ku xiriirin karnaa macaamiisha u qalma ilaha gargaarka tamarta.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan tixraac su'aalaha ku qoran qaybta hoose:

[FAQ] **Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo**

1. Sidee lacagta dheeriga ah uga muuqataa qaansheegta?

   Iyada oo ah shay meel gooni ah lagu qoray oo lagu calaamadeeyay " Feb 2021 Weather Event (Febraayo 2021 Dhacdada Cimilada)."

2. **Goorma ayaa la dabaqi doonaa bisha koowaad ee lacagta dheeriga ah, imisa bilood ayay socon doontaa?**

   kharashyada ayaa dhaqangalaya laga bilaabo Sebtember 2021 – Noofembar 2023.

3. **Waa maxay caddadka guud ee celceliska macmiilka deggan uu ku bixin doono lacagta dheeraadka ah?**

   MPUC waxay noo oggolaanaysaa inaan uruurino kharashyada gaaska ee xad dhaafka ah in ka badan 27 bilood laga bilaabo Sebtember 2021.

   - Lacagtu waxay noqon doontaa mid mug leh, ama loogu soo dalacay sida "kulayl," oo macaamiishu waxay dhimi karaan cadadka ay bixiyaan haddii ay ka shaqeeyaan ilaalinta tamarta.
   - Lacagtu waxay ka badan doontaa xilliga xagaaga marka loo eego bilaha lahu jiro jiilaalka.
   - Kharashka ayaa badnaan doona 12-ka bilood ee u dambeeyay kasoo kabashada.
   - MPUC waxay dib u eegeysaa kharashyadii aan ku bixinay gaaska intii lagu jiray Febraayo 13-17, 2021. Haddii ay ogaadaan in qaar ka mid ah kharashyadeena aan loo baahnayn, ama haddii aan helno gaas-bixiye ama lacag-celin dowladeed ama magdhaw kale, waxaan yarayn doonaa qiimayaasha hore u socda iyo/ama waxaan soo celin doonaa wixii lacagaha la uruuriyay oo siyaado ah
   - Haddii MPUC ay go'aamiso in dhammaan kharashyada si taxaddar leh loo galay, celceliska macmiilka deggan wuxuu bixin doonaa qiyaastii $11.30 bishii (ama wadar ahaan $305) muddo 27 bilood ah.

4. **Macaamiisha ma bixin karaan lacagta lagu leeyahay xilli hore?**

   Maya. Lacagta dheeraadka ah ayaa bil kasta lagu dabaqi doonaa biilka macmiilka iyada oo ku saleysan isticmaalka kuleylka bishaas.

5. **MPUC ma ansixisay lacagtan dheeraadka ah?**

   MPUC waxay ansixisay lacagta dheeraadka ah ee billaha ah, laga bilaabo Sebtember 2021, si loo soo celiyo kharashyada gaaska dabiiciga ah ee badan laga bilaabo Febraayo 13-17, 2021. Si kastaba ha ahaatee, MPUC waxay wali dib u eegaysaa kharashaadka ay gashay CenterPoint

Energy iyo adeegyada kale ee gaaska dabiiciga ah ee gobolka ee la habeeyay. Haddii MPUC ay go'aamiso in qaar ka mid ah kharashaadka aan si macquul ah loo gelin, ama haddii aan helno adeeg bixiye lacagta soo-celiyo, maaliyadda dowladda ama magdhaw kale, waxaan hoos u dhigi doonnaa qiimayaasha hore u socda iyo/ama lacag soo celinta la ururiyey ee ka badan kharashyada la oggolaaday.

6. **Ma jiraan kooxo macaamiil ah oo laga dhaafi doono lacagta dheeraadka ah?**

Kooxaha soo socda ayaa laga dhaafi doonaa:

- Macaamiisha helay Low-Income Home Energy Assistance (Kaalmada Tamarta Guriga ee Dakhliga Yar) (LIHEAP) intii lagu jiray xilliyadii wax kululaysiga ee 2019-2020 iyo 2020-2021, laga bilaabo Juun. 30, 2021.
- Macaamiisha degaanka ee la daahday lacag bixinta akoonkooda gaaska inta u dhaxaysa 60-120 maalmood laga bilaabo Juun. 30, 2021.
- Macaamiisha gaadiidka* oo ahaa macaamiil gaadiid intii lagu jiray Febraayo 13-17, 2021.

OGOOW: Macaamiisha 121 maalmood ama in ka badan la daahay lacag bixinta ayaa la siin doonaa lacag bixinta dheeraadka ah.

*Adeegyada Gaadiidka ee CenterPoint Energy waxay siisaa dadka isticmaalo iyo macaamiisha ganacsiga gaaska dabiiciga ah ee kujira nidaamkeena qaybinta si ay u helaan bixiyayaal gaas dabiici ah oo wanaagsan.

Faahfaahino dheeraad ah:

- CentrePoint Energy waxay marmar dib u habeyn ku samayn doontaa macaamiisha deggen ee laguy daboolay ka-dhaafitaankan, iyada oo ka reebaysa macmiil kasta oo cusub oo leh LIHEAP ama lagu yeesha lacag 60-120 maalmood gudahood. Waxaan sidoo kale ka saari doonnaa macaamiisha aan mar dambe ku dhicin qaybta dembiyada.
- Kuwa helay LIHEAP ama ku dhaca 60-120 maalmood oo dambi ah laga bilaabo Janaayo 31, 2022, waa laga dhaafi doonaa laga bilaabo Maarso 1, 2022.
- Macaamiisha qaata LIHEAP ama ku dhaca 60-120 maalmood oo dambi ah laga bilaabo Luulyo 31, 2022, waa laga dhaafi doonaa laga bilaabo Sebtember 1, 2022.
- Kuwa ku jira labadan qaybood laga bilaabo Janaayo 31, 2023, waa laga dhaafi doonaa laga bilaabo Maarso 1, 2023.

7. **Lacagta dheeraadka ah miyaa loo xisaabiyaa si ka duwan iyadoo ku salaysan heerka sicirka?**

Maya. Dhammaan heerka sicirka waxaa lagu soo oogi doonaa qiime isku mid ah. Si kastaba ha ahaatee, lacagta dheeraadka ah LAGUMA qiimeyn doono akoonada gaadiidka ee helayay adeegga gaadiid bishii Febraayo 2021 ama macaamiisha deegaanka ee helay LIHEAP ama la daahay lacan bixinta in u dhaxaysa 60-120 maalmood.

**8. Ka warran haddii istimaalka is beddelo muddada lacag-bixinta; tusaale ahaan, haddii goobta ganacsiga loo xiray COVID awgii?**

Waxaan soo jeedinay kharash ku saleysan wixii la isticmaalo. Haddii goobta ganacsigu la xiri lahaa sidaas darteedna aysan isticmaalin wax gaas ah, iyagu mas'uul kama aha inay iska bixiyaan kharashka.

**9. Maxaa dhacaya haddii ay jirto arrin ah dhanka akhrinta mitir shaqsi?**

Kharashyadan waxay raaci doonaan isla habraacyada biilka ee hadda la isticmaalo. Tusaale ahaan, haddii akhriska mitirku u baahan yahay in la qiyaaso ama dib loo saxo, biilka ugu horeeyay ayuu ku salaysnaan doonaa qiyaasta/akhrinta hore iyo marka akhrinta mitirka saxda ah la sameeyo, farqi kasta oo u dhexeeya akhrinta qiyaasta ah iyo akhrinta dhabta ah waa la xisaabin doonaa oo macaamilka gaarka ah waxaa lagu soo dallaci doonaa oo keliya isticmaalka dhabta ah (oo ay ku jiraan khidmadaha Dhacdada Cimilada Febraayo 2021).

**10. Maxaa dhacaya haddii macmiilku guuro ka hor dhammaadka 27-da bilood ee loo oggolaaday soo kabashada?**

Haddii macmiilku ka guuro ama si kale u joojiyo adeegga uu ka qaato CenterPoint Energy Minnesota Gas, mar dambe ma heli doonaan biil leh khidmadaha Dhacdada Cimilada Febraayo 2021. Si kastaba ha ahaatee, macmiil kasta oo cusub oo bilaaba adeegga waxaa lagu soo dallaci doonaa khidmadaha Dhacdada Cimilada Febraayo 2021. Macmiilka cusub ayaa mas'uul ka ah bixinta lacagta dheeraadka ah inta lagu jiro bilaha ka harsan muddada soo kabashada qiimaha 27-da bilood ah (haddii aysan buuxin shuruudaha ka-dhaafitaan ee hore loo soo xusay).

**11. Lacagta dheeraadka ah miyaa lagu bixinayaa gaaska dabiiciga ah ee lagu isticmaalo meel ka baxsan Minnesota?**

Maya. Lacagta dheeraadka ah waxay dib u soo celinaysaa kharashaadka gaaska dabiiciga ah ee la iibsaday oo la siiyay macaamiisheena Minnesota. Minnesota waxay qabtaay nidaam sharciyeed oo adag si loo hubiyo in macaamiishu ay bixiyaan kaliya sahayda gaaska dabiiciga ah ee laga isticmaalay gobolka.

**12. Lacagta dheeraadka ah ma ku jirtaa kharash dulsaar ah ee gaaska dabiiciga ah?**

Maya. Lacagta dheeraadka ah kuma jirto wax dulsaar ah ama kharashyada maalgelinta ah. Si da ay ansixiyeen Minnesota Public Utilities Commission (Guddiga Adeegyada Dadweynaha ee Minnesota) (MPUC), lacagta dheeraadka ah wuxuu kaliya soo celiyaa qiimaha dhabta ah ee gaaska dabiiciga ah ee la iibsaday oo la siiyay macaamiisheena intii lagu jiray Febraayo 13-17, 2021.

**13. CenterPoint Energy miyey macaash ka heshaa lacagta dheeraadka ah?**

Maya. Qiimaha aan ku bixino gaaska dabiiciga ah waxaa si toos ah loogu gudbiyaa macaamiisheena iyadoon wax kharash dheeri ah lagu darin, mana ka macaashno iibinta gaas ka dabiiciga ah.

**14. Maxay CenterPoint Energy ugu sheegi weyday macaamiisha inay dhowraan gaaska dabiiciga ah waqtiga si looga fogaado kharashyadan dheeraadka ah?**

Adeeg ahaan ahaan, waa inaan hubinnaa inuu jiro gaas dabiici ah oo ku filan si mar walba loo daboolo baahiyaha macmiilka, gaar ahaan maalmaha uu jiro qabow daran. Febraayo 2021 cimilada aadka u daran iyo sicirka gaaska dabiiciga ah ayaa dhacay Jimcihii ka hor dhammaadka fasaxa Maalinta Madaxweynayaasha, markaas oo annaga (iyo adeegyada kale) ay ahayd inaan horay u helno gaas dabiici ah oo nagu si loo daboolo baahiyaha macmiilka illaa Talaadada soo socota. Sababtoo ah macaamiisha deggan looma baahna inay u hoggaansamaan codsi ah in la dhawro tamarta, waa wax aan suurtogal ahayn in horay loo sii ogaado qdarka, ama inta ugu yar, baahida guud ee gaaska dabiiciga ah ay isbeddeli karto waqti gaar ah. Haddii aan macaamiisha ka codsan lahayn in ay dhawraan tamarta, gaas yar ku iibsadaan weydiintaas, laakiin dhammaan macaamiishu ma ilaalin, ma heli lahayn gaas ku filan oo aan macaamiisha ku diirino inta lagu jiro xilli qabow oo cajiib ah.

Iyada oo la yareeynayo isticmaalka gaaska dabiiciga ah, dhawrista ayaa ka caawin karta macaamiisha inay lacag ku kaydsadaan biilashooda korontada. Si kastaba ha ahaatee, wixii ah macaamiisha deggan, isticmaalka waxaa lagu cabiraa oo lagu soo dallacaa qaab bille ah. Natiijo ahaan, ujeedooyinka biilka, ma jirto hab lagu kala sooci karo macmiilka laga yaabo inuu doortay inuu dhawro gaaska inta lagu jiro Maalmaha fasaha ee Madaxweynayaasha marka kharashka gaasku ka sarreeyo macaamilka dhawray dabayaaqadii Febraayo markii kharashaadka gaasku hoos u dhacay. Markaa, macaamiisha dhawrtay intii ay dhacdadu socotay ma arki doonaan biilashooda oo hoos u dhacay marka loo eego macaamiishii meel kale ku dhawray intii lagu jiray bishii Febraayo.

**15. Miyeysan awoodin CenterPoint Energy inay ka hortagto kharashyadan dhaaraadka ah?**

Ma xakameyno qiimaha suuqa gaaska dabiiciga ah. Annagu ma soo saarno, ma habaynno, mana ka ganacsano gaaska dabiiciga ah. Adeeg ahaan ahaan, ganacsigeennu waa in aan gaaska dabiiciga ah ka iibsanno suuqa si ammaan ah, oo lagu kalsoonaan karo loo gudbiyo macaamiisheena deggan iyo kuwa ganacsatada ah.

Sida adeegyada korontada ee gobollo kale oo badan, waxaa qasab nagu noqotay inaan suuqyada ka iibsanno gaaska dabiiciga ah inta lagu jiro Febraayo 2021. Ka sokow gaas gudbinta ugu hooseeyo iyo kaydinta gaaska, iibsiyadaani waxay daruuri u ahaayeen inay ka dhigaan macaamiisheena kuwa qabo nabadgelyo iyo diirimaad xilliga uu jiro qabow daran. Marka ay adeega korontadu u baahan tahay inay iibsato gaaska dabiiciga ah ee muddada-gaaban maalmaha fasaxa usbuuca, qiimaha dhabta ah lama oga ilaa ka dib marka gaaska la iibsado. Qorshaheena agabka gaaska ayaa ka ilaaliyay macaamiisha qiimayn dheeri ah oo lagu qiyaasay $570 milyan oo doolar iyadoo la adeegsanayo tallaabooyin isku dhafan si looga gaashaanto isbeddellada suuqa, oo ay ku jiraan xayndaabka, kaydinta, maalgelinta ilaalinta, iyo xakamaynta.

**16. Ma jiraa qof raadinaya in kharashyadan dheeriga ah loo qiil-dayo?**

In kasta oo ay oggolaatay adeegyada gaaska dabiiciga ah ee gobolka si ay u bilaabaan dib-u-soo-kabashada qiimaha lacagta dheeriga ah iyada oo laga bilaabayo Sebtember 1, 2021, MPUC ma aysan samayn go'aan kama dambeys ah oo ku saabsan tirada guud ee adeegsi kasta aakhirka soo kaban karo. Taa bedelkeeda, sida ay wada jir ku codsadeen adeegyadu, MPUC waxay amartay dacwad la isku haysto oo ka socota Xafiiska Dhegeysiyada Maamuleed si loo qiimeeyo in ficillada adeegyadu ay yihiin kuwo miyir leh, kharashyaduna ay macquul yihiin. Garsooraha sharciga maamulka ayaa soo saari doona warbixin marka la gaaro Meey 4, 2022, iyadoo ay soo jeedinayaan MPUC, oo markaas go'aamin doonta wadarta guud ee adeegsi kasta kasoo kaban karo.

**17. Sidee bay CenterPoint Energy uga hortegi doontaa kharashaadka dheeriga ah ee sidan oo kale ah inay dhacaan mustaqbalka?**

Iyadoo la tixgalinayo dhacdooyinka suuqa Febraayo, waxaan sii wadnaa inaan dib u eegno qorshaha iibsiga gaaska dabiiciga ah ee sannadlaha ah si loo aqoonsado wixii isbeddel mustaqbalka ah. Waqtiga fog, waxaan raadineynaa fursado lagu kala duwo ilaheen keena gaaska dabiiciga ah ee leh gaaska dabiicga ee lagu sameeyo Minnesota kaasoo dib loo isticmaali karo iyo hydrogen cagaaran.

Waxa kale oo naga go'an inaan la shaqayno adeegyada kale ee korontada iyo daneeyayaasha kale si aan u sii wadno dib-u-habaynta suuqa ama isbeddellada sharciyeed ee heer federaal oo ka hortagi doona qiimayaasha mustaqbalka iyo ilaalinta macaamiisha adeegga.

**18. Xaggee ayay macaamiishu aadi karaan haddii ay rabaan inay diiwaangeliyaan dareenkooda meel ka baxsan CenterPoint Energy?**

Macaamiishu waxay cabashadooda ku qori karaan Docket 21-135 iyagoo raacaya tilmaamaha MPUC ee lagahelayo barta website, ama waxay MPUC kala xiriiri karaan lambarka 651-296-0406.